**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**
**WASAARADDA CADAALADDA IYO ARRIMAHA DASTUURKA**

# HINDISE-SHARCIYEEDKA “KAALMO-SHARCIYEEDKA FEDERAALKA”

**Waxaa diyaariyey: Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, 2023**

## CUTUBKA KOWAAD
## QODOBBO GUUD

### Qodobka 1aad
### Magaca Xeerka

1) Xeerkan waxaa lagu magacaabaa "*Xeerka Kaalmo-sharciyeedka Soomaaliya*".

### Qodobka 2aad
### Qeexid

Iyadoo la tixgelinayo ujeeddada Xeerkan, erayada soo socda wuxuu mid walba leeyahay macnaha ku hor qoran:

- "**Idman**" waxaa loola jeedaa qof ama hay'ad kasta oo ay u oggolaadeen Guddiyada Kaalmo-sharciyeedka Federaalka, Gobolka Banaadir ama Dawlad-goboleed kasta oo Xubin ka ah Federaalka inuu bixiyo Kaalmo-sharciyeed;
- **"Talo-bixin"** waxaa loola jeedaa talo-bixin kaalmo sharci oo af ama qoraal ah oo uu bixiyo sharciyaqaan, si waafaqsan shuruucda Dalka;
- "**Qareen**" waxaa loola jeedaa qof kasta oo leh rukhsad Qareen sida ku cad Sharciga Qareennada Soomaaliyeed;
- **"Gargaar"** waxaa loola jeedaa gargaar loo qabanayo qof kasta oo u baahan gargaar la xiriira dacwooyinka, iyadoo loo qabanayo hab ka-wakiil-ahaansho si waafaqsan sharuucda Dalka;
- **"Kaaliye Qareen"** waxaa loola jeedaa qof kasta oo caawiya ama ka hoos shaqeeya Qareen, kaasoo aan haysan Rukhsad Qareen;
- "**Guddi**" waxaa loola jeedaa Guddiga Kaalmo-sharciyeedka Federaalka, ama Guddiga Dawlad-goboleed kasta oo Xubin ka ah Federaalka;
- "**Xafiiska Kaalmo-sharciyeedka Gobolka Banaadir**" waxaa loola jeedaa Xafiiska Kaalmo-sharciyeedka Gobolka Banadir ee uu asaasay Guddiga Kaalmo-sharciyeedka Federaalka;
- "**Dastuur**" waxaa loola jeedaa Dastuurka Ku-meel-gaarka ah ee JFS ama Dawlad-goboleed kasta oo Xubin ka ah Federaalka;
- "**Heshiis Iskaashi**" waxaa loola jeedaa heshiis dhexmara Guddiga iyo bixiye idman ee kaalmo-sharciyeed oo dejinaya xuquuqda iyo waajibaadka Guddiga iyo bixiyaha kaalmo-sharciyeedkaas;
- "**Guddiga Federaalka ee Kaalmo-sharciyeedka**" waxaa loola jeedaa Guddiga lagu dhisay si waafaqsan Xeerkan si uu u go'aamiyo qaab-hawleedka kaalmo-sharciyeedka Qaran, si looga hirgeliyo Guddiyada Gobolka Banaadir iyo Dawlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Federaalka iyo xafiisyadooda kaalmo-sharciyeedka;
- "**Guddiga Kaalmo-sharciyeedka Dawlad-goboleedka Xubinta ka ah Federaalka"** waxaa loola jeedaa Guddi lagu dhisay si waafaqasan shuruucda Dawlad-goboleed kasta oo Xubin ka ah Federaalka;

- “**Rug sharci**” waxaa loola jeedaa Rug sharci ee jaamacad oo hoos-timaada kormeerka qareen u qalma oo shaqaaleysiiya ardayda sharciga oo hoos-taga kormeerka qareenkaas iyo in laga shaqaaleysiin karo kaaliyeyaal qareen;
- “**Kaalmo-sharciyeed**” waxaa loola jeedaa kaalmo-sharciyeedka asaasiga ah iyo kan heerka labaad ee la siiyo muwaadiniinta iyo degganeyaasha rasmiga ah ee aan dhaqaale ahaan awoodin in ay iska bixiyaan xushmada qareenka;
- “**Tilmaan Kaalmo-sharciyeed**” waxaa loola jeedaa tilmaan loo cuskaday si waafaqsan Qodobka 39[aad] ee Xeerkan oo qeexaya in hab-raacyada maamul ee lagu hirgelinayo mashruuca kaalmo-sharciyeedka ee federaalka, heerarka Gobolka Banaadir iyo Dawlad-goboleed kasta oo Xubin ka ah Federaalka;
- “**Bixiye Kaalmo-sharciyeed**” waxaa loola jeedaa qof ama cid kasta ee uu idmaday Guddiga Kaalmo-sharciyeedka Federaalka, Gobolka Banaadir ama Dawlad-goboleed kasta oo Xubin ka ah Federaalka si uu u bixiyo kaalmo-sharciyeedka asaasiga ah iyo kan heerka labaad;
- “**Kaaliye sharci**” waxaa loola jeedaa qof aan ahayn qareen ama kaaliye qareen oo ay qoratay Dawladda ama hay’ad aan-dawli ahayn si uu u bixiyo kaalmo-sharciyeed asaasi ah oo ku sugnaanaya kormeerka qareen;
- “**Wasiir**” waxaa loola jeedaa Wasiirka Cadaaladda ee Xukuumadda JFS ama Wasiiradda Cadaaladda Dawlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Federaalka (DXF);
- “**Wasaarad**” waxaa loola jeedaa Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka ee Xukuumadda JFS ama Wasaaradaha Cadaaladda Dawlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Federaalka (DXF);
- “**Kaalmeeye sharci**” waxaa loola jeedaa qof uu qortay Guddiga, waax dawladda ka tirsan ama bulshada rayidka kaasoo dhammeystay tababar waxbarasho oo uu ansixiyey Guddiga, ama tababar waxbarasho ee uu fuliyey urur aan-dawli ahayn oo uu idmaday Guddigu, iyo bixiye kaalmo-sharciyeed asaasi ah si waafaqsan kormeerka qareen idman, balse aan haysan rukhsad qareennimo;
- “**Sabool”** waxaa loola jeedaa qof kasta oo aan dhaqaale ahaan awoodi karin in uu iska bixiyo kharashaadka dacwadda ee looga baahan yahay;
- “**Kaalmo-sharciyeedka Asaasiga ah**” waxaa loola jeedaa kaalmo-sharciyeedka asaasiga ah sida ku qeexan Qodobka 8[aad] ee Xeerkan.
- **“Ka-wakiil-ahaansho”** waxaa loola jeedaa Ka-wakiil-ahaansho ku aaddan ujeeddooyinka dacwada;
- “**Heerka labaad ee kaalmo-sharciyeedka**” waxaa loola jeedaa ka-wakiil-noqoshada macaamiisha sida ku cad Qodobka 8[aad] ee Xeerkan;
- “DXF” waxaa loola jeedaa Dawlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Federaalka; iyo
- “JFS” waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

## Qodobka $3^{aad}$
## Ujeeddada Xeerka

Ujeeddooyinka ugu muhiimsan ee laga leeyahay Xeerkan waxaa ka mid ah:

1) In kor loo qaado cadaaladda iyo sarreynta sharciga si qof walba u helo kaalmo-shaciyeedka uu u baahan yahay oo ah xaqa ka-wakiil-noqosho sharci, marka uusan qofku lahayn awood dhaqaale, sida dadka saboolka ah iyo kuwa nugul.

2) In la dhiso qaab-hawleed talo-bixin, gargaarid iyo ka-wakiil-noqosho iyadoo dhaqaalaha ay bixinayso dawladda, isla markaana aragtidu tahay in la caawiyo shakhsiyaadka aan awoodin in ay helaan talo-bixin, gaargaarid ama ka-wakiil-noqosho sharci sabab la xiriirta dhaqaalahooda awgeed.

3) In Kaalmo-sharciyeedku yahay qaabka keliya ee lagu xaqiijin karo in ay helaan dadka saboolka ahi fursad Cadaaladeed oo loo siman yahay.

4) In Kaalmo-sharciyeedku u fududeeyo dadka saboolka ah iyo kuwa nugulba helidda xuquuqda Dastuuriga ah ee ku aaddan in si siman loola dhaqmo sharciga iyo Maxkamadda hortooda.

5) In ay taabba-geliyaan Dawladda Federaalka, Gobolka Banaadir iyo Dawladaha Xubnaha ka ah Federaalka (DXF) nidaam ka-wakiil-noqosho sharci iyadoo la siinayo cid kasta oo u baahan oo aan dhaqaale ahaan isku-filnayn kaalmo-sharci.

6) Xeerkani wuxuu ku saleysan yahay tixraac Qodobbada $29^{aad}$ (5), $34^{aad}$ (4), (5) iyo $35^{aad}$ (6) ee Dastuurka Ku-meel-gaarka (KMG) ah ee JFS, Qodobka $15^{aad}$ ee Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed ee 1963 iyo Qodobka $14^{aad}$ (2) ee Xeerka Nidaamka Garsoorka ee 1962.

## CUTUBKA LABAAD
## MABAADI'DA GUUD

### Qodobka 4^aad
### Mabaadi'da Guud

1) Kaalmo-sharciyeedku waa inuu noqdaa adeeg ay heli karaan dhammaan qeybaha bulshadda iyo cid kasta oo sharcigu u dammaanad-qaaday helitaankeeda si waafaqsan Dastuurka iyo Xeerkan.

2) Hannaanka iyo Hab-raacyadda bixinta kaalmo-sharciyeedka waa inuu waafaqaa xeerarka asaasiga ah ee Qaranka, gaar ahaan Dastuurka Ku-meel-gaarka ah, Xeerarkan iyo heshiisyada Caalamiga ah ee Soomaaliya ay qeyb ka tahay.
3) Hawl-galka maamul ee Kaalmo-sharciyeedku waa inuu noqdaa mid u madax-bannaan fulinta hawlaha loo idmaday.

4) Kaalmo-sharciyeedku wuxuu khuseeyaa dacwadaha madaniga iyo kuwa ciqaabta ee heerka asaasiga ah iyo heerka labaad.

5) Kaalmo-sharciyeedka asaasiga ah waxaa la siinayaa cid kasta oo sabool ah iyadoo aan loo eegeyn heerka dhaqaale, kaalmo-sharciyeedka heerka labaad waxaa loo tixgelinayaa macnaha iyo caddeymaha dhaqaale taasoo laga tixraacayo qodobbada 38^aad iyo 39^aad ee Xeerkan.

6) Tayada Kaalmo-sharciyeedku waa inay noqotaa mid xaqiijinaysa in dadka adeegsanaya ay fursad buuxda u helaan difaac caddaaladeed oo la siman tan la siiyo dadka kale ee leh awoodda helitaanka qareennada.

### Qodobka 5^aad
### U-sinnaanta Xaqa Helidda Difaac-qareen

1) Xeerkani wuxuu waafaqsanyahay Dastuurka Jamhuuriyadda Federalka Soomaliya
2) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu helo difaac qareen oo lacag la'aan ah marka uu u baahdo, si waafaqsan Dastuurka KMG ah ee JFS, Xeerkan iyo Shuruucda kale ee Federaalka, Gobolka Banaadir iyo DXF.
3) Xaqa helitaanka adeegyada kaalmo-sharciyeedka waa in uu ahaadaa xaq loo siman yahay dhammaan, si waafaqsan Dastuurka KMG ah ee JFS.

## Qodobka6aad
## Takoor-la'aan

1) Kaalmo-sharciyeedka ay bixiyaan hay'adaha kaalmo-sharciyeedka waa inuu saldhig u noqdaa mabaadi'da takoor la'aanta, iyadoo aysan jirin takoor ku saleysan da', jinsi, midab, luqad, lahjad, diin, siyaasad ama fikrad kale oo dhalin karta fal takoorid ah.

2) Waa in la helaa tallaabooyin gaar ah oo la ansixiyey (xeer-nidaamiye) si loo hubiyo xuquuqda haweenka, carruurta, barakaceyaasha gudaha iyo dadka qaba baahiyaha gaarka ah in ay helaan Kaalmo-sharciyeed waqtiga ku habboon iyo sida ugu habboon oo aan takoor lahayn.

## Qodobka 7aad
## Helidda Kaalmo-sharciyeedka Xilli Habboon

1) Qof kasta oo la qabto ama la xiro ama qeyb ka ah tallaabo maamul (administrative action) ama doonaya in uu gudbiyo ama iska difaaco dacwad madani ah wuxuu xaq u leeyahay:
   b. In uu helo kaalmo-sharciyeedka asaasiga ah iyo kan heerka labaad ee uu xaqa u leeyahay;
   t. in lagu wargeliyo xuquuqda kaalmo-sharciyeed ee uu xaqa u leeyahay;
   j. in lagu wargeliyo hab-raacyada lagu heli karo kaalmo-sharciyeedka si waafaqsan Xeerkan;
   x. in lagu wargeliyo halka ugu dhaw ee kaalmo-sharciyeedka laga heli karo; iyo
   kh. in lagu wargeliyo magaca hay'adda ugu dhaw ee u xilsaaran bixinta kaalmo-sharciyeedkaas.

2) Si waafaqsan ujeeddooyinka faqrada (1) ee qodobkan, dhammaan Guddiyadu waxay xaqiijinayaan in macluumaadka ku saabsan bixiyeyaasha kaalmo-sharciyeedka idman ee ugu dhaw laga yeelo mid laga heli karo adeegga guud ee dadweynaha ee saldhig boolis kasta, xarun hayn, dhisme maxkamad ama xabsi iyo la xiriiridda dadka u baahan kaalmo-sharciyeedka goobahaas.

## CUTUBKA SADDEXAAD
## ADEEG-BIXIYEYAASHA IYO KA-FAA'IDAYSTEYAASHA KAALMO-SHARCIYEEDKA

### Qodobka 8aad
### Heerarka Kaalmo-sharciyeedka iyo Cidda Bixin Karta

1) Kaalmo-sharciyeedka asaasiga ah (primary legal aid) waxaa la siinayaa cid kasta, iyadoo aan loo eegeyn dadka Saboolka ah ama aan awoodin in ay iska bixiyaan adeegga qareenka dhaqaalahooda awgiis, waxaana ka mid ah kaalmooyinka sharci ee la siin karo cid kasta:
   (b) bixinta talo sharci ee arrimaha sharciga;
   (t) bixinta gargaar sharci ee Xallinta khilaafaadka, iyadoo la adeegsanayo qaababka dacwad-qaadista aan tooska ahayn sida wada-xaajood, dhexdhexaadin iyo heshiisiin ay sameeyaan odoyaasha dhaqanka ama sharci-yaqaanada si madax-bannaan;
   (j) u-gudbinta macaamiisha bixiyeyaasha kaalmo-sharciyeedka heerka labaad;
   (x) gargaarka macaamiisha ee hadal-qoraalka cabashooyinka iyo dokumentiyada kale;
   (kh) bixinta macluumaadka sharci ee ku saabsan shuruucda khusaysa Soomaaliya, xuquuqda iyo xilalka shakhsiyaadka ee ku aaddan sharciga iyo qaababka kala duwan ee meel-marinta iyo fulinta xuquuqaha si waafaqsan sharciga; iyo
   (d) qabashada barnaamijyo wacyi-gelin sharci si wax looga baro dadka kaalmo-sharciyeedka iyo sharuucda kale ee Dalka.

2) Shakhsiyaadka soo socda ayaa bixin kara kaalmo-sharciyeedka asaasiga ah:
   b) qareennada idman;
   t) kaaliyeyaasha Qareennada idman;
   j) shakhsiyaadka mudan ee idman oo sugaya in loo oggolaado in ay Qareenno noqdaan;
   (x) shakhsiyaadka kale ee ku habboon mudanna oo ay magacawdo maxkamaddu si ay wakiil uga noqdaan dadka ku eedaysan dacwadaha fal-dembiyeedyada;
   (kh) gargaareyaasha sharci ee u shaqeeya bixiyeyaasha idman ee kaalmo-sharciyeedka oo gargaara dadka eedaysaneyaasha ah;
   (d) kaalmeeyeyaasha sharci ee u shaqeeya bixiyeyaasha idman ee kaalmo-sharciyeedka ee aan-dawliga ahayn;
   (r) ardayda sharciga ee u shaqeeya Xarumaha sharci ee idman iyo
   (s) odoyaasha dhaqanka ama xeer-beeg.

3) Kaalmo-sharciyeedka heerka labaad waxaa la siinayaa shakhsiyaadka mudan kaalmo-sharciyeedka si waafaqsan mudnaanshaha iyo heerka dhaqaalaha ee ku xiran Tilmaamaha Kaalmo-sharcyeedka oo ay ku jiraan:
   b) la-talinta macaamiisha;

t) ka-wakiil-noqoshada iyo difaacidda macaamiisha ee dacwadaha fal-dembiyeedka inta lagu guda-jiro maxkamadaynta ka hor, maxkamadaynta dhexdeeda iyo kaddib maxkamadaynta;
j) ka-wakiil-noqoshada macaamiisha dhanka hay'adaha iyo difaaca dacwadaha madaniga ah;
x) ka-wakiil-noqoshada macaamiisha dhanka dacwadaha ee hor yaal hay'adaha maamulka dadweynaha;
kh) diyaarinta hadal-qoraalada iyo jawaab-celinada dacwooyinka sharci;
d- gudbinta doodaha sharci ee maxkamadaha hortooda;
r) bixinta ka-wakiil-noqosho sharci ee heer caalami; iyo
s) qabashada dhammaan hawlahaas iyadoo wakiil laga yahay macaamiisha in qareennada iyo kaaliyeyaasha qareennada ay mudan yihiin in ay qabtaan si waafaqsan sharciga.

4) Shakhsiyaadka soo socda ayaa bixin kara heerka labaad ee kaalmo-sharciyeedka:
b) qareen idman;
t) kaaliye qareen idman;
j) shakhsi mudan oo idman oo aan kamid ahayn qareennada hawl-qabad ee ay magacawday maxkamaddu; iyo
x) arday sharci oo u shaqeeya Xarun sharci ee idman oo ku hoos jira kormeeridda guud ee qareen idman.

5) Ururka Qareennada Soomaaliyeed ee heer Federaal ama heer DXF waxay iskood u bixinayaan adeegga Kaalmo-sharciyeed heerarkiisa kala duwan marka uu codsi ka soo gaaro qof u baahan kaalmo-sharciyeedka ama Maxkamad awood u leh.

## Qodobka 9aad
## Qareennada, Kaaliyeyaasha Qareennada iyo Shakhsiyaadka Mudan oo aan ku jirin Qareennada ay magacawday Maxkamaddu

1) Qareennada, kaaliyeyaasha qareennada iyo shakhsiyaadka mudan oo aan ku jirin qareennada ay magacawday maxkamaddu, kuwaas oo bixiya adeegyada Kaalmo-sharciyeed si waafaqsan Xeerkan waxaa xil ka saaran yahay inay si habsami iyo meel-mar leh u bixiyaan adeegyada Kaalmo-sharciyeedka ee ku faahfaahsan Qodobka 8aad ee Xeerkan.

2) Qareennada, kaaliyeyaasha qareennada iyo shakhsiyaadka mudan oo aan ku jirin hawl-qabadka qareennada ay magacawday maxkamaddu, oo loo idman karo in ay noqdaan bixiyeyaal kaalmo-sharciyeed waxaa ka mid ah:
(b) difaacayaasha dadweynaha ee ka shaqeeya Xafiiska Kaalmo-sharciyeedka ama Xafiiska Difaacayaasha Dadweynaha si waafaqsan Dastuurka iyo

Shuruucda Dalka, Gobolka Banaadir iyo Dawlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Federaalka; iyo

(t) qareennada, kaaliyeyaasha qareennada iyo shakhsiyaadka mudan oo aan ku jirin hawl-qabadka qareennada ay magacawday maxkamaddu, kuwaasoo uu heshiis la galay ama uu magacaabay Guddi.

3) Xeerkan laguma dabaqayo qareennada aan idmanayn ee madaxa-bannaan, kaaliyeyaasha qareennada iyo shakhsiyaadka mudan oo aan ku jirin hawl-qabadka qareennada ay magacawday maxkamaddu, ama kuwa u shaqeeya ururro aan-dawli ahayn, kuwaasoo xil ka saaran yahay in ay gacan-siiyaan dadka baahida u qaba adeegyada kaalmo-sharciyeedka asaasiga ah iyo kan heerka labaadba.

## Qodobka 10aad
## Ururrada Aan-dawliga ahayn (NGO's), Ururrada Bulshadda Rayidka iyo Xarumaha Sharciga

1) Ururrada aan-dawliga ahayn (NGOs), ururrada bulshadda rayidka ah iyo Xarumaha sharci oo loo idmaday adeeg-bixiyeyaasha Kaalmo-sharciyeedka sida ku xusan **Qodobka 39aad** ee Xeerkan, waa in ay bixiyaan adeegyada kaalmo-sharciyeed ee ku tilmaaman **Qodobka 11aad** ee Xeerkan, si waafaqsan heshiisyada ay ururradaasi la galeen Guddiga ay khusayso.

2) Xeerkani ma saameynayo ururrada aan-dawliga ahayn, ururrada bulshada rayidka ah iyo Xarumaha sharci oo aan shaqadoodu ahayn bixinta adeegyada Kaalmo-sharciyeedka ee ku xusan **Qodobka 11aad** ee Xeerkan.

3) Dhammaan ururrada ama hay'adaha bixiya Kaalmo-sharciyeedka waxaa looga baahan yahay in ay iska diiwaan-geliyaan, isla markaasna ka haystaan rukhsad Wasaaradda Cadaaladda ee heerarka ay ka hawl-galaan.

## Qodobka 11aad
## Adeegsi Kaaliyeyaasha Maxkamadda iyo Saraakiisha Xafiisyada Degmada oo aysan ka jirin Bixiyeyaal Kale ee Kaalmo-sharciyeed

Guddiga ay arrintu khuseyso waa in uu:

1) U xilsaaraa meeshii aysan ka jirin bixiyeyaal kaalmo-sharciyeed ee degmo, Sarkaal Boolis oo u tababaran Sharciga goobta Maxkamadda Degmadda, si uu u noqdo sarkaal kaalmo-sharciyeed ee gargaara kaalmo-sharciyeedka asaasiga ah.

2) U magacaabaa meeshii aysan ka jirin hay'adaha bixiya kaalma-sharciyeedka ama xafiiska degmada ay khusayso kaaliye sharci, ama wuxuu heshiis iskaashi la

gelayaa hay'ad aan-dawli ahayn oo ka diiwaan-gashan degmadda si ay ugu shaqaaleysiiso kaaliyeyaal sharci oo bixiya adeegga kaalmo-sharciyeedka asaasiga ah.

## Qodobka 12aad
## U-gudbinta Guddiyada Xallinta Khilaafaadka ee Dhaqanka iyo Diinta halka aysan ka jirin bixiyeyaal Kaalmo-sharciyeed

1) Dacwooyinka ku habboon, meeshii aysan ka jirin bixiyeyaal kaalmo-sharciyeed ama xafiisyo kaalmo-sharciyeed kale ee degmo, saraakiisha iyo kaalmeeyeyaasha sharci ee lagu xusay Qodobka 11aad ee xeerkan, waxay macaamiisha u weecin karaan guddiyada xallinta khilaafaadka ee dhaqanka iyo diinta.

2) Marka dacwada loo gudbiyo guddi xallin khilaafaad ee dhaqanka ama diinta wuxuu guddigaasi xaqiijinayaa in khilaafkaas lagu xalliyo si waafaqsan mabaadi'da ku aaddan xuquuqda asaasiga ah ee Shareecada Islaamka & Dastuurka.

## Qodobka 13aad
## Ka-faa'iideysteyaasha Kaalmo-sharciyeedka

Qof kasta oo xaq u leh helitaanka Kaalmo-sharciyeedka, si waafaqsan Qodobbada 5aad iyo 6aad ee Xeerkan, wuxuu yeelanayaa xuquuqaha soo socda:

- b) xaq-u-lahaanshaha helitaanka Kaalmo-sharciyeedka si takoorid-la'aan ah;
- t) xaq-u-lahaanshaha xallinta gal-dacwadeedka si ku habboon adeegyada Kaalmo-sharciyeedka;
- j) xaq-u-lahaanshaha helitaanka kaalmo-sharciyeed ee dhammaan heerarka dacwooyinka madaniga iyo ciqaabta ah;
- x) xaqa uu u leeyahay in la caawiyo loolana dhaqmo si xushmad iyo qaddarin leh;
- k) xaqa in markasta uu bixiyaha kaalmo-sharciyeedku ku wargeliyo halka ay dacwadiisu maraysa, garsooridda, gaarsiinta iyo la-talinta ee adeeg-bixiyeyaasha Kaalmo-sharciyeedka; iyo
- d- xaqa uu u leeyahay in laga dhaafo kharashka iyo khidmadda Maxkamadda.

## Qodobka 14aad
## Dadka Codsan kara Kaalmo-sharciyeedka

Waxaa codsan kara Kaalmo-sharciyeed si loogu sameeyo adeeggan:

- b) codsadaha;
- t) qof kasta oo uu wakhiishay Codsadaha si qoraal ah; iyo
- j) qof kasta ama urur kasta oo uu u idmaday codsadaha si qoraal ah, inuuwakiil ka noqdo, sababo caafimaad oo la xiriira awood-la'aan xagga jirka ama maskaxda awgood.

## CUTUBKA AFARAAD
## ASAASKA GUDDIYADA KAALMO-SHARCIYEEDKA

### Qodobka 15aad
### Asaaska iyo xubnaha Guddiga Kaalmo-sharciyeedka Federaalka

1) Xeerkan waxaa lagu asaasayaa "**Guddiga Kaalmo-sharciyeedka Federaalka**" oo leh shakhsiyad-qaanuuneed oo u gaar ah.

2) Guddigu wuxuu ka koobnaanayaa 9 (sagaal) xubnood, waana sidan soo socota:
   - b) Garsoore Maxkamadda Sare oo uu soo magacaabo Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Dalka JFS;
   - t) Xubin ka tirsan Wasaaradda Cadaaladda ee Xukuumadda JFS oo uu soo magacaabay Wasiirka;
   - j) Xubin ka tirsan Xafiiska Garyaqaanka Guud Ee Dawladda oo uu soo magacaabo Garyaqaanka Guud Ee Dawladda.
   - x) Xubin ka tirsan Ururka qareennada ee JFS oo uu soo magacaabo Guddoomiyaha Ururka Qareennada JFS;
   - kh) Xubin ka tirsan ururrada Aan-dawliga ahayn ee ka hawl-gala Federaalka ee bixiya Kaalmo-Sharciyeedka, oo ay soo magacowdo Dalladda ururradaas mideysa;
   - d) Hormuudka Kulliyadda Qaanuunka iyo Shareecada ee Jaamacadda Ummada Soomaaliyeed (JUS), oo uu soo magacaabayo Guddoomiyaha Jaamacadda Ummadda;
   - r) Xubin ka tirsan Ciidamada Asluubta ee Dawladda Federaalka oo uu soo Magacaabayo Taliyaha Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed ee JFS.
   - s) Xubin ka socotta Guddiga Xuquuqul Insaanka Soomaaliyeed, oo uu soo magacaabo guddoomiyaha guddigaas.
   - Sh) Sarkaal Sare oo ka tirsan qeybta xuquuqda ee Taliska Booliiska Soomaaliyeed oo uu soo magacaabo Taliyaha Booliiska Soomaaliyeed.

### Qodobka 16aad
### Asaaska iyo Xubnaha Guddiyada Kaalmo-sharciyeedka Dawlad-goboleed Xubin ka ah Federaalka

1) Gobolka Banaadir iyo Dawladaha Xubnaha ka ah Federaalka waxay si waafaqsan sharcigan ay u asaasayaan guddi kaalmo-sharciyeed oo leh shakhsiyad qaanuun oo isaga u gaar ah, si waafaqsan Qodobada khuseeya ee Dastuurka Ku-meel-gaarka ah ee JFS iyo Dastuurka Dawlad-goboleedka Xubinta ka ah Federaalka ee ay khusayso iyo xeerarka u gaarka ah Gobolka Banaadir.

2) Guddi kasta oo Dawlad-goboleed wuxuu ka koobnaanayaa 5 (Shan) xubnood, waana sidan:
   b) Garsoore ka socda Maxkamadda ugu sareysa Dawlad-goboleed kasta oo uu soo magacaabo Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee DXF;
   t) Xubin ka tirsan Wasaaradda Cadaaladda DXF oo uu soo magacaabo Wasiirka;
   j) Xubin ka tirsan ururrada qareennada ee DXF oo uu soo magacaabo Guddoomiyaha ururka Qareennada Dawlad-goboleedka;
   x) Xubin ka tirsan ururrada aan-dawliga ahayn oo bixiya Kaalmo-sharciyeed, oo ka hawl-gala DXF oo uu soo magacaabo guddoomiyaha dallada ururradaas midaysa
   kh) Xubin ka tirsan Kulliyad Shareecada iyo Qaanuunka oo uu soo magacaabo Hormuudka Kulliyadaha Shareecada iyo Qaanuunka oo leh Xarun Kaalmo-sharci.

## Qodobka 17aad
## Magacaabidda Xubnaha Guddiga

1) Xubnaha Guddiga Kaalmo-sharciyeedka Federaalka waxaa lagu soo magacaabayaa qaab awood-qeybsi ah iyadoo la raacayo sida ku cad Qodobka 15aad ee xeerkan, xubin kasta oo ka mid ah Guddiga waxaa Dikreeto ku soo magacaabayo Madaxa sare ee Hay'adda uu ka socdo.

2) Xubnaha Guddiyada Kaalmo-sharciyeedka ee DXF waxaa lagu soo magacaabayaa qaab awood-qeybsi ah sida ku cad Qodobka 16aad ee Xeerkan, iyadoo uu xubin kasta oo kamid ah Guddiga uu Dikreeto ku soo magacaabayo Madaxa sare ee Hay'adda uu ka socdo.

3) Xubnaha Guddiga waxaa lagu soo xulayaa mabaadi'da sinnaanta iyo takoorid-la'aanta taasoo ku saleysan isu-dheelitirnaanta Jinsiga.

## Qodobka 18aad
## Magacaabidda iyo Awoodaha Guddoomiyaha Guddiga

1) Guddoomiyaha Guddiga waxaa iska dhex dooranaya xubnaha Guddiga fadhiga ugu horreeya oo uu yeesho Guddigu.

2) Awoodaha Guddoomiyaha Guddiga waxaa kamid ah:
   b) u-yeeridda iyo qabashada dhammaan kulammada Guddiga;
   t) isagoo ay wehliyaan xubno kale ee Guddiga, kormeeridda habsami-u-socodka hawlaha Guddiga;
   j) isagoo la-tashi la sameynaya xubnaha kale ee Guddiga in uu bixiyo abaal-marinta iyo anshax-marinta hawl-wadeennada Guddiga;

x) isagoo ay wehliyaan xubno kale ee Guddiga, tixgelinta iyo meel-marinta qorsheyaasha miisaaniyadda iyo warbixinnada maaliyadda;
(kh) isagoo ay wehliyaan xubno kale ee Guddiga, isku-duwidda xiriirada u dhexeeya Guddiga iyo hay'adaha kale ee ay khusayso; iyo
(d) Isagoo ay wehliyaan xubno kale ee Guddiga, ansixinta iyo meel-marinta go'aannada Guddiga.

## Qodobka 19aad
## Magacaabidda iyo Awoodaha Guddoomiye Ku-xigeenka Guddiga

1) Guddoomiye Ku-xigeenka Guddiga waxaa iska dhex dooranaya xubnaha Guddiga ee fadhiga ugu horreeya oo uu yeesho Guddigu.

2) Awoodaha Guddoomiye Ku-xigeenka Guddiga waxaa kamid ah:
   b) buuxinta kaalinta Guddoomiyaha Guddiga marka uu maqan yahay ama uusan gudan karin xilalkiisa sababo meel-mar ah awgood; iyo
   t) Qabashada wixii kale ee xilal ah ee uu u xilsaaro Guddoomiyuhu.

## Qodobka 20aad
## Magacaabidda iyo Awoodaha Xoghayaha Guddiga

1) Xoghayaha Guddiga waxaa magacaabaya xubnaha Guddiga kaddib faafinta xayeysiinta codsiyada jagada, qaaditaanka wareysiyo iyo xulashada tartamaha ku habboon in loo magacaabo xilkaas;

2) Awoodaha Xoghayaha Guddiga waxaa kamid ah:
   b) wargelinta iyo diyaarinta ajendayaasha kulammada Guddiga;
   t) diyaarinta dokumentiyada lama-huraanka ah ee kulammada Guddiga;
   j) isku-duwidda iyo ururinta warbixinnada loo baahan yahay in la horgeeyo Guddiga;
   x) diyaarinta misaaniyad-sannadeedka kaalmo-sharciyeedka, oo ku saleysan soo-jeedinnada daneeyeyaasha, iyo u-gudbintooda Guddiga si uu u meel-marsiiyo;
   kh) xaqiijinta bed-qabka dhammaan dokumentiyada iyo warbixinnada la xiriira hawlaha maamulka ee Guddiga; iyo
   (d) iyadoo wada-tashi lala sameynayo Guddiga, inuu magacaabo hawl-wadeennada lama-huraanka u ah in ay gargaaraan Xoghayaha si ay u qabtaan xilalkooda.
   r) qaadidda iyo diyaarinta dhammaan hadal-qoraallada kulammada Guddiga Kaalmo-sharciyeedka iyo diiwaan-gelintooda.

3) Xoghayaha Guddiga Kaalmo-sharciyeedka Federaalka wuxuu ku shaqeynayaa Xarunta Kaalmo-sharciyeedka Guddiga ee ku taala Caasimadda JFS

4) Xoghayaha Guddiga Kaalmo-sharciyeedka Gobolka Banaadir wuxuu ku shaqeynayaa xafiis ku yaal Xarunta Kaalmo-sharciyeedka Gobolka Banaadir, iyadoo Xoghayaha Guddiyada Kaalmo-sharciyeedka Dawlad-goboleedka Xubinta ka ah Federaalka uu ku shaqeyn doono Xafiiska Kaalmo-sharciyeedka ee magaalo-madaxda Dawlad-goboleedka Xubinta ka ah Federaalka ee ay khusayso.

## Qodobka 21aad
## Shuruudaha Xoghayaha Guddiga

Shuruudaha looga baahan yahay qofka noqonaya Xoghayaha Guddiga waa:

b) inuu yahay muwaadin Soomaaliyeed;
t) in aysan da'diisu ka yarayn 30 (soddon) sano;
j) haysto shahaado jaamacadeed oo la aqoonsan yahay ee shareecada iyo Qaanuunka ama midkood;
x) inuu leeyahay ugu yaraan 3 (seddex) sano oo waayo-arragnimo shaqo ah ee la xiriira arrimaha sharciga, maamulka ama maareynta;
kh) in aysan maxkamadi ku xukumin fal-dembiyeed shantii (5) sano ee ugu dambeysay; iyo
(d) inuu yahay qof leh anshax-wanaagsan iyo akhlaaq suuban.

## Qodobka 22aad
## Guntanka iyo Cod-bixinta Kulammada Guddiga

1) Guddigu wuxuu kulmayaa ugu yaraan 3(saddex) biloodba mar, balse Guddoomiayaha waa u yeeri karaa kulammada aan caadiga ahayn si waafaqsan Faqradda (5) ee isla Qodobkan.

2) Kulammada Guddigu waxay ku guntamayaan marka ay goob-joog yihiin ugu yaraan 50%+1 (boqolkiiba konton oo lagu daray hal) ee tirada guud ee Xubnaha Guddiga.

3) Guddigu wuxuu go'aannada ku gaarayaa aqlabiyad fudud oo ah 50%+1 (boqolkiiba konton lagu daray hal) ee tirada xubnaha uu fadhigu ku guntamay ama jooga kulanka.

4) Haddii codadku isla'ekaadaan xilliga cod-bixinta ee Xubnaha Guddiga, wuxuu Guddoomiyuhu yeelanayaa cod lagu kala baxo oo dheeraad ah;

5) Qabashada kulan aan caadi ahayn waxaa awood u leh Guddoomiyaha ama soo-jeedin ay saxiixaan ugu yaraan 3 (saddex) xubnood ee Guddiga ka mid ah.

6) Dhammaan kulammada waa in si rasmi ah (qoraal ama af) lagu wargeliyaa Xubnaha Guddiga ugu yaraan 24 (afar iyo labaatan) saacadood ka hor taariikhda iyo waqtiga qabashada shirka.

7) Dhammaan go'aannada Guddigu waa in loo diiwaan-geliyaa qoraal ahaan, isla markaana lagu keydiyaa galka hadal-qoraalka rasmiga ah ee Guddiga.

8) Hadal-qoraalka kulammada iyo nuqullada dhammaan go'aannada Guddiga, waa in loo diraa dhammaan xubnaha Guddiga, iyadoo isla markaana nuqullo go'aannadaas iyo dokumentiyadaas ah si rasmi ah loogu keydinayo diiwaanada xusuus-dhawrka xafiiska.

## Qodobka 23aad
## Xarumaha Guddiga

1) Xarunta Guddiga Kaalmo-sharciyeedka Federaalka waxay noqonaysaa magaalo-madaxda dalka ee Muqdisho, wuxuuna xarumo ku yeelan karaa Magaalo-madaxyada DXF.

2) Guddiga Kaalmo-sharciyeedka ee Federaalka Xaruntiisu tahay Muqdishu ayaa ka shaqeynaya Gobolka Banaadir.

3) Xarunta Guddiga Kaalmo-sharciyeedka DXF waxay noqonaysaa Magaalooyinka ay u arkaan in ay ku habboon tahay.

## Qodobka 24aad
## Shuruudaha Magacaabidda Xubnaha Guddiga

Qofka loo xulanayo inuu xubin ka noqdo Guddiga waa:

b) inuu yahay muwaadin Soomaali ah;
t) inuu haysto shahaado jaamacadeed ee la aqoonsan yahay oo dhanka sharciga ah ama shahaado kale oo u dhiganta;
j) inuu leeyahay ugu yaraan 3 (saddex) sano oo waayo-arragnimo shaqo ah ee hay'adaha Cadaaladda;
x) in uusan lahayn taariikh fal-dembiyeed oo ay ku xukuntay maxkamad sharci, gudaha ama dibadda dalka, kaasoo ka hor-istaagi kara inuu qabto mas'uuliyaddaas; iyo
kh) inuu ka dhawrsan yahay anshax-xumo iyo akhlaaq-xumo.

## Qodobka 25aad
## Mushaarka Xubnaha Guddiga

Marka laga reebo Xoghayaha Guddiga iyo hawl-wadeennada gargaaraya, xubnaha Guddiga lama siinayo mushaar balse waxay helayaan gunno fadhi oo dheef iyo gaadiid ah marka ay ka qeyb-gelayaan kulammada Guddiga.

## Qodobka 26aad
## Hawlaha Guddiga

Hawlaha Guddigu waxaa ka mid ah:

b) diyaarinta iyo dib-u-eegista qaab-siyaasadeedka ku aaddan adeegga kaalmo-sharciyeedka;

t) hubinta in habsami loo fuliyey adeegyada Kaalmo-sharciyeedka;

j) kormeerid iyo qiimeyn lagu sameeyo waxqabadka adeegyada kaalmo-sharciyeedka;

x) magacaabidda, tababaridda, dalacsiinta iyo anshax-marinta hawl-wadeennada Xafiiska Kaalmo-sharciyeedka, si waafaqsan shuruucda dalka;

kh) aqoonsiga iyo la-gelitaanka heshiisyo iskaashi ee bixiyeyaasha kaalmo-sharciyeedka;

d) sameynta iyo ilaalinta heerarka asaasiga ah iyo hawlaha nidaaminta Kaalmo-sharciyeedka;

r) xaqiijinta in Guddiga iyo Xafiisyada Kaalmo-sharciyeedka ay leeyihiin hawl-wadeenno ku filan gudashada xilka iyo hawlaha loo idmaday Guddiga;

s) u-gudbinta warbixin-sanadeedka waxqabadka Guddiga Wasaaradda si loo hor-dhigo Baarlamaanka;

sh) talo-siinta Wasaaradda iyo Baarlamaanka oo ku aaddan siyaasadaha iyo qaanuunka lama-huraanka ah ee looga baahan yahay si kor loogu qaado bixinta adeegyada kaalmo-sharciyeedka ee la siinayo dadka saboolka ah iyo kuwa nugul ee Soomaaliya;

dh) diyaarinta miisaaniyadda iyo xisaab-xirkeeda si waafaqsan xeerarka xisaabaadka dawladda ee JFS; iyo

c- Xaqiijinta daah-furnaansho iyo isla-xisaabtan iyadoo la baahinayo warbixin-sanadeedka Guddiga oo kooban oo lagu faafinayo wargeyska iyo warbaahinta ugu caansan.

## Qodobka 27aad
## Muddada Xil-haynta Xubnaha Guddiga

1) Muddada Xil-haynta Xubnaha Guddiga waa 5 (shan) sano oo la cusboonaysiin karo 1 (hal) mar oo keliya, laga bilaabo taariikhda magacaabidda xubinimada Guddiga.

2) Haddii xubinta guddiga kamid ka ah ee lasoo magacaabay ay lumiso kamid ahaanshiyaheeda Hay'adda ay ka tirsaneyd markii hore, inta lagu guda jiro mudda xileedka guddigaan si waafaqsan faqrada 1aad ee qodobkaan, waxaa uu guddoomiyaha Hay'adda uu dib usoo magacaabayaa xubin kale, taasi oo guddiga kamid noqonaysa inta ka dhiman mudda xileedka Guddigan

## Qodobka 28aad
## Shaqo-ka-joogsashada Xubnaha Guddiga

Xubinta Guddiga waxay shaqada ka joogsanaysaa haddii:
- b) muddada xil-hayntu ka dhammaato;
- t) uu iska casilo xilka;
- j) uu gudan-waayo xilkiisa sabab caafimaad awgeed;
- x) ay ku timaado geeri;
- kh) xil-ka-qaadis lagu sameeyo anshax-xumo baahsan awgeed, sida ku cad Qodobka 29aad ee Xeerkan; iyo
- d) uu isu sharaxo mansab siyaasadeed.

## Qodobka 29aad
## Xil-ka-qaadista Xubnaha Guddiga

1) Xilka ayaa laga qaadayaa xubin Guddiga kamid ah haddii:
   - b) uu la yimaado fal anshax-xumo baahsan oo lagu xaqiijiyo codadka 2/3 (saddex-meelood labo) tirada guud ee Xubnaha Guddiga;
   - t) uu isu sharaxo xil siyaasadeed
   - x) ; si kama-dambays ah loogu xukumo fal-dembiyeed uu galay; ama
   - j)Guddigu ku helo in uu si ku-talo-gal ah ugu xad-gudbay Xeerkan Dastuurka ku meel-gaarka ah ee JFS iyo shuruucda kale ee Dalka;.

2) Hab-raaca xil-ka-qaadista xubin kamid ah Guddiga waxaa lagu soo saarayaa qoraal soo-jeedin xil-ka-qaadista oo ay ku saxiixan yihiin Guddoomiyaha Guddiga iyo ugu yaraan 2 (labo) xubnood oo kamid ah Guddiga, kaddib marka lagu ansixiyo cod dhan 50%+1 (boqolkiiba konton oo lagu daray hal) ee tirada guud ee xubnaha Guddiga, waxaa qoraal xilka looga qaadayo soo saaraya Gudoomiyaha Guddiga.

## CUTUBKA SHANAAD
## FULINTA KAALMO-SHARCIYEED EE GUDDIGA

### Qodobka 30aad
### Isku-dubbaridka Xiriirka Hay'adaha Kale

Marka laga reebo xilkiisa gaarka ah ee ku xusan Xeerkan, Guddigu isagoo kaashanaya hay'adaha dawliga ah, kuwa aan-dawliga ahayn iyo dadka kale ama hay'adaha ku hawlan horumarinta adeegyada Kaalmo-sharciyeedka, waa inuu isku-duwo:

b) horumarinta qorshe lagu fulinayo bixinta kaalmo-sharciyeed ee dhammaan Soomaaliya, Gobolka Banaadir iyo Dawlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Federaalka, sida hadba xaalku yahay, oo ay fuliyaan Xafiisyada kaalmo-sharciyeedka, la-hawl-galeyaasha iskaashi iyo ururrada aan-dawliga ahayn;

t) la-tashiga hay'adaha ay khusayso; iyo

j) talo-bixin in la baraarujiyo arrimaha ku aaddan canshuur-dhimida iyo ka-dhaafitaanka shakhsiyaadka iyo ururrada bixiya dhaqaale ama taageera bixinta kaalmo-sharciyeedka heer Qaran.

### Qodobka 31aad
### Qaab-dhismeedka Xafiiska Kaalmo-sharciyeedka

Qaab-dhismeedka Xafiiska Kaalmo-sharciyeedka wuxuu ka kooban yahay:

1) Agaasime;
2) Qeybta adeegyada kaalmo-sharciyeedka;
3) Qeybta maamulka iyo maaliyadda;
4) Qeybta wacyi-gelinta bulshada iyo talo-bixinta; iyo
5) Hawl-wadeennada Xafiiska.

### Qodobka 32aad
### Mas'uuliyadda Hawl-wadeennada

1) Guddigu wuxuu ka mas'uul yahay waxyeellada ka dhalata xil-gudasho-xumada ay ku kacaan Saraakiisha, Hawl-wadeennada ama Shaqaalaha Guddiga, iyagoo gudanaya xilalka loo idmaday.

2) Guddiga iyo cid kasta oo wakiil ka ah ama hawl-wadeennada fulinaya hawlaha Guddiga ee loo idmaday waxaa xil ka saaran yahay in ay waajibaadkooda u gutaan sida ugu habboon oo ku saleysan meel-mar, sida ilaalinta xogaha shakhsiyeed ee dadka ay u adeegayaan ama hay'adaha ay wada-shaqeyntu kala dhexayso.

## Qodobka 33aad
## Waajibaadka Guddiga

Guddigu wuxuu yeelanayaa waajibaadka soo socda:

1. Dejinta Siyaasadaha la xiriira Kaalmo-sharciyeedka.
2. La-talinta Wasiirka ay khuseyso intii awooddiisa ku siman in la sameeyo xeer-nidaamiye kasta ee looga baahan yahay hirgelinta Xeerka kaalmo-sharciyeedka;
3. Diyaarinta iyo ansixinta Tilmaanta Kaalmo-sharciyeedka ee ku aaddan maamulidda iyo hirgelinta kaalmo-sharciyeedka intii awooddiisa ku siman.
4. Kormeeridda iyo daba-galka hawlaha ay qabtaan adeeg-bixiyeyaasha kaalmo-sharciyeedka intii awooddiisa ku siman si waafaqsan Xeerkan.
5. Xaqiijinta la-xisaabtanka cid kasta oo bixisa adeeg kaalmo-sharciyeed intii awooddiisa ku siman.
6. Dejinta iyo diyaarinta qaab iskaashi iyo wada-tashi ee dhexmara hay'daha ku hawlan bixinta kaalmo-sharciyeedka intii awooddiisa ku siman sida uu tilmaamayo Xeerkan.
7. Qorsheynta iyo ansixinta misaaniyad-sannadeedka kaalmo-sharciyeedka intii awooddiisa ku siman.
8. Diyaarinta qorshe-hawleedka sannadlaha ah ee kaalmo-sharciyeedka intii awooddiisa ku siman.
9. Diyaarinta warbixin-sannadeedka ee wax-qabadka Guddiga iyo hirgelinta kaalmo-sharciyeedka intii awoodooda ku siman sida caqabadaha jira iyo ka-talo-bixinta xallintooda, iyo u-gudbinta warbixintaas dhammaan hay'adaha ay khuseyso intii awooddiisa ku siman.
10. Diyaarinta xisaab-xirrada maaliyad-sannadeedka muujinaya sida miisaaniyadda loo isticmaalay intii awoodooda ku siman iyo hubinta in xisaab-xirradaas loo hanti-dhawray si waafaqsan xeerarka guud ee xisaabaadka dawladda Federaalka, Gobolka Banaadir iyo Dawlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Federaalka.
11. Qiimeynta iyo anshax-marinta hawl-wadeennada iyo adeeg-bixiyeyaasha kaalmo-sharciyeedka intii awoodooda ku siman, iyo u-gudbinta warbixinnada lama-huraanka ah hay'adaha ay khusayso.
12. Keydinta diiwaan-gelinta, idmanaanshaha, baabi'inta idmanaanshaha iyo diiwaan-ka-saaridda adeeg-bixiyeyaasha intii awoodooda ku siman.
13. Xallinta cabashooyinka dadweynaha, iyo cabashooyinka adeeg-bixiyeyaasha iyo deeq-bixiyeyaasha ee ku aaddan hawlaha iyo adeegyada kaalmo-sharciyeedka si waafaqsan Xeerkan iyo shuruucda kale ee dalka, intii awoodooda ku siman.

## Qodobka 34aad
## Idmanaanshaha Bixiyeyaasha Kaalmo-sharciyeedka

1) Guddiga ay khuseyso wuxuu idmanaan siinayaa shakhsiyaadka iyo hay'adaha intii awooddiisa ku siman inay bixiyaan adeegyo kaalmo-sharciyeed si waafaqsan qodobka 39aad ee Xeerkan.

2) Guddiga ay khuseyso wuxuu heshiis iskaashi la gelayaa shakhsiyaadka iyo hay'adaha intii awooddiisa ku siman si loogu idmado bixiyeyaal kaalmo-sharciyeed si waafaqsan Xeerkan.

3) Guddiga ay khuseyso haddii la jebiyo heshiiska iskaashi ee ku tilmaaman Qodobkan 34 (2) ee Xeerkan ama ay jirto sabab meel-mar ah wuxuu baabi'in karaa idmanaanshaha shakhsi ama hay'ad, wuxuuna wargelinayaa cid kasta oo ay khuseyso muddo ku siman 30 (soddon) maalmood gudahood, marka laga bilaabo taariikhda go'aanka la gaaray.

4) Cid kasta oo aan ku qanacsanayn go'aanka uu gaaray Guddiga Gobolka Banaadir ama Dawlad-goboleed Xubin ka ah Federaalka si ku aaddan diidmo idmanaansho-siin ama kala-noqosho idmanaansho, wuxuu rafcaan u gudbisan karaa Guddiga Kaalmo-sharciyeedka Federaalka muddo ku siman 30 (soddon) maalmood gudahood, marka laga bilaabo taariikhda go'aanka la gaaray.

5) Haddii rafcaanlaha lagu tilmaamay Qodobkan 34aad (4) ee Xeerkan, uu ku qanci-waayo go'aanka Guddiga Kaalmo-sharciyeedka Federaalka, wuxuu rafcaanluhu codsi dib-u-eegis go'aanka u qaadan karaa maxkamadda awoodda u leh ee fadhigeedu yahay halka uu ka hawl-galo Guddiga gaaray go'aanka diidmada idmanaansha-siinta ama kala noqday idmanaanshaha rafcaanlaha.

## Qodobka 35aad
## Shuruudaha Adeeg-bixiyeyaasha Kaalmo-sharciyeedka

Hay'ad kasta oo bixinaysa adeegyo kaalmo-sharciyeed waa in:

b) ay lahaato idmanaansho si waafaqsan Xeerkan;
t) ay lahaato waayo-aragnimo bixinta adeegyada kaalmo-sharciyeedka;
j) ay yeelato ugu yaraan 1 (hal) qareen oo kormeere ah ama joogto ah;
x) ay lahaato ugu yaraan 1 (hal) kaaliye qareen; iyo
kh) aysan hawl-wadeennadeedu lahayn taariikh anshax-xumo.

## Qodobka 36aad
## Kaaliyeyaasha Qareennada

Kaaliye Qareen oo doonaya in loo idmado inuu noqdo bixiye kaalmo-sharciyeed si waafaqsan Xeerkan waa in:

b) uu haystaa shahaado jaamacadeed ee Kulliyad Sharci oo la aqoonsan yahay;
t) da'diisu aysan ka yarayn 21 (kow iyo labaatan) sano;
j) uu leeyahay anshax wanaagsan;
x) ku sugnaado kormeerka qareen idman; iyo
kh) uu leeyahay fayo-qab caafimaad ee xil-gudasho.

**CUTUBKA LIXAAD**
**SANDUUQ KAALMO-SHARCIYEED IYO**
**QODOBBO ISKU-DHAF AH**

## Qodobka 37aad
## Asaasidda Sanduuq Kaalmo-sharciyeed

Si dhaqaale loogu helo adeegyada mashruuca kaalmo-shacriyeedka qaran:

1) Waxaa la aasaasayaa Sanduuq dhaqaale oo u gooni ah kaalmo-sharciyeedka oo uu meel-mariyo Golaha Wasiirrada Xukuumadda JFS, si loogu maamulo kaalmo-sharciyeedka ee dhammaan Soomaaliya.

2) Ilaha dhaqaale ee Sanduuqa Adeegga Kaalmo-sharciyeedka Qaran waxa ay ka imaanayaan meelaha soo socda:
   b) lacago ay u qoondeyso Dawladdu oo ujeeddadiisu tahay fulinta qorshe-hawleedka adeegyada Kaalmo-sharciyeedka;
   t) deeq kasta, hadiyad, amaah iyo waxyaabaha kale ee loo hibeeyo adeeg-bixinta Kaalmo-sharciyeedka;
   j) lacagaha la siiyo kaalmo-sharciyeedka ee uu Guddigu awood u leeyahay in uu isticmaalo si waafaqsan Xeerkan ama si ku saleysan shuruucda kale ee dalka; iyo
   x) ilaha kale ee lacageed oo si sharci ah loogu deeqay ama loo deymiyey Guddiga oo ka yimid hay'adaha kale ee dawladda oo ay tahay in la daah-furo inta aan la isticmaalin, si waafaqsan xeer-nidaamiyeyaasha maamulka maaliyadda ee dawladda JFS.

   1. Guddiga waa inuu ka furtaa bankiyada lambar xisaab-socota, si loogu adeegsado kharash-bixinta khuseysa hirgelinta mashruuca kaalmo-sharciyeedka qaran ee dhammaan Soomaaliya, si waafaqsan Xeerkan.

## Qodobka 38aad
## Xeer-nidaamiyeyaal

1) Wasaaradda Cadaaladda ee heer federal ama heer dawlad-goboleed waxay kartaa, kaddib la-tashiga Guddiga ay khusayso, in ay soo saarto xeer-nidaamiyeyaal looga baahan yahay habsami-u-hirgelinta Xeerkan muddo meel-mar ah gudaheed, laga bilaabo taariikhda uu Xeerkani dhaqan-gal noqdo, waxay soo saaraysaa xeer-nidaamiyeyaal si habsami ah loogu hirgeliyo Xeerkan muddo meel-mar ah, laga bilaabo taariikhda uu dhaqan-galka noqdo Xeerkani.

2) Wasaaradda Cadaaladda waxay soo saaraysaa xeer-nidaamiyeyaal xiriir la leh nidaamyada ku aaddan hawl-gallada iyo hab-raacyada, marka laga bilaabo taariikhda la magacaabo Guddiga ay khuseyso.

## Qodobka 39aad
## Tilmaan Kaalmo-sharciyeed

1) Guddiga ay khuseyso wuxuu baahinayaa Tilmaan Kaalmo-sharciyeed oo ka kooban:
   b) arrimaha gaarka ah ee mashruuca lagu bixinayo kaalmo-sharciyeedka;
   t) hab-raaca maamulka ee kaalmo-sharciyeedka;
   j) codsiga iyo foomamka kale ee kaalmo-sharciyeedka;
   x) khidmadaha lagu dhiibayo adeegyada bixiyeyaasha kaalmo-sharciyeedka ee dacwadaha iyo dacwad-socodsiinnada kala duwan;
   kh) hab-raacyada kor-joogteynta iyo qiimeynta bixinta kaalmo-sharciyeedka; iyo
   (d) arrin kasta oo kale oo uu Guddigu go’aamiyo.

2) Qodobbada tilmaanta waxay saaran yihiin Guddiga, hawl-wadeennadiisa iyo bixiyeyaasha kaalmo-sharciyeedka.

## Qodobka 40aad
## Qorsheyaasha Kala-guurka

1) Qorsheyaasha kaalmo-sharciyeedka hadda jira ee ay hoggaaminayso Wasaaradda Cadaaladda Federaalka, iyo heshiisyada u dhexeeya Wasaaradda, deeq bixiyeyaasha iyo bixiyeyaasha kaalmo-sharciyeedka, way sii soconayaan ilaa Guddiyada kaalmo-sharciyeedka Federaalka, Gobolka Banaadir iyo Dawlad-goboleedka Xubinta ka ah Federaalka la asaaso isla markaana la bilaabo hirgelinta mashruuca kaalmo-sharciyeedka qaran si waafaqsan Xeerka Kaalmo-sharciyeedka.

2) Qorsheyaasha kaalmo-sharciyeedka hadda jira ee u dhexeeya Wasaaradaha Cadaaladda, Gobolka Banaadir iyo Dawlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Federaalka, deeq-bixiyeyaasha iyo bixiyeyaasha kaalmo-sharciyeedka, way sii soconayaan ilaa Guddiyada kaalmo-sharciyeedka Federaalka, Gobolka Banaadir iyo Dawlad-goboleedka Xubinta ka ah Federaalka la asaaso isla markaana la bilaabo hirgelinta mashruuca kaalmo-sharciyeedka qaran si waafaqsan Xeerkan.

3) Diiwaan-geliyaha wuxuu diiwaan-geliyaa Qareennada iyo hay’adaha bixiya adeegga kaalmo-sharciyeedka.

## Qodobka 41$^{aad}$
## Baabi'in

Waxaa la baabi'iyey Sharci kasta oo ka hor-imaanaya ama aan la socon karin Xeerkan oo khuseeya bixinta Kaalmo-sharciyeedka Soomaaliya.

## Qodobka 42$^{aad}$
## Dhaqan-gal

Xeerkani wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu ansixyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, uuna saxiixo Madaxweynaha JFS, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.